# MAGAALADA CAMBRIDGE

GUDDIGA GUDDIDA DOORASHADA

689 Massachusetts Ave Ste 1, Cambridge, Massachusetts 02139-3302 ▪ Taleefanka 617-349-4361 ▪ TTY: 617-492-0235
Fakis: 617-349-4366 ▪ Iimayl: Elections2@cambridgema.gov ▪ Websayd: www.cambridgema.gov/election

GUDDIYADA
Ethridge A. King, Jr.
Larry W. Ward
Charles J. Marquardt
Thomas J. Stohlman, Jr.

AGAASIMAHA FULINTA
Tanya L. Ford

KAALIYAHA AGAASIMAHA
Lesley A. Waxman

**Cod-bixiyaha sharafta leh ee ku dhaqan Cambridge,**

**Guddiga Guddoonka Doorashooyinka, iyagoo raacaya Qoddobka 630 ee Xeerarka 1989, waxay u soo gudbinayaan codbixiyayaasha Cambridge qoraalka Su'aalaha Codbixinta #1 (Ballot Questions #1 ) sida ay ugu muuqan doonto warqadda codbixinta DOORASHO DEEGAANKA ee qabsomaysa NOFEMBAR 4, 2025, iyo sidoo kale dulucda soo jeedinta iyo doodaha taageersan iyo kuwa ka soo horjeeda, sida uu qabo Qoddobka 630 ee Xeerarka soona baxay 1989.**

City Council (Golaha Magaaladu) waxa uu soo jeediyay in la ansixiyo Dastuurka Magaalada ee cusub, kaas oo ah xeer dejinaya nidaamka maamulka magaalada Cambridge. Dastuurku wuxuu qeexayaa awoodaha City Council, City Manager-ka, iyo Guddiga Dugsiga.

City Council ayaa Abriil 14, 2025 u codeeyay in Dastuurka cusub ee Magaalada loo gudbiyo cod-bixiyayaasha Magaalada Cambridge si uga go'aan gaaraan doorashada la qabto labadii sanaba mar ee soo socota loona dareeri doono Nofembar 4, 2025, iyadoo lagu soo bandhigayo su'aasha ah:

| | |
|---|---|
| **Su'aasha 1-aad** | Miyaad aqbalaysaa Xeer u dejinaaya Dastuur Magaalada Cambridge? |

**Dulucda soo jeedinta:** City Council wuxuu soo jeediyay in la beddelo Dastuurka Plan E ee Magalada ee hadda la adeegsanayo ee ku qoran Xeerarka Guud, Qoddobkiisa 43, Faqradda 93, laguna beddelo Dastuurka Magaalada ee cusub.

Si waafaqsan Dastuurka cusub ee Magaalada, Cambridge waxaa lagu sii maamuli doonnaa nidaamka dowladeed ee City Council/City Manager. City Council, oo ka kooban sagaal xubnood oo la soo magacaabay soona doorteen cod-bixiyayasha magaalada muddo labo sanno ah si ku dhehan saami qaybsiga, waxayna fulin doonnaan awoodaha sharci-dejineed ee Magaalada. Xubnaha City Council ee la soo doorto muddo xileed kasta waxay xubnahooda ka dhex dooran doonaan maayar/duq iyo maayar/duq ku xigeen iyadoo loo qadaayo cod aqlabiyadeed kuwaas oo xilka hayn doona muddo 2-sannadood ah. Isla sida uu qabo Dastuurka Plan E ee hadda dhaqangashan, Duqa magaalada wuxuu sii ahaan doonnaa madaxa rasmiga ah ee dhammaan xafladaha guud ee magaalada, sarkaalka guddoominaya City Council, xubin ka mid ah Guddiga Dugsiga, mana yeelan doono awood xeer joojin, waxa uuna lahaani awood la mid ah tan xubnaha kale ee golaha. City Council ayaa sii wadi doona inay si toos ah u magacaabaan City Manager-ka, City Auditor, iyo City Clerk.

Sida waafaqsan Dastuurka cusub ee Magaalada, City Council ayaa sii wadi doona magacaabista City Manager, kaas oo noqon doona madaxa fulinta ee magaalada waxaana uu kaga mas'uul noqon doonaa City Council maamulidda toosan ee dhammaan arrimaha magaalada ee ay waajibaadkiisa ay tahay City Manager-ka iyadoo la raacayo sida uu dhigaayo mise ku cad dastuurka. City Manager ayaa mas'uul ka ah hirgelinta siyaasadaha ay dejiyaan City Council, sida ka muuqata codadka iyo go'aamada City Council, iyo xeerarka, amarada qoondaynta, iyo oggolaanshaha amaahda.

Sida uu dhigayo Dastuurka cusub ee Magaalada, Guddiga Dugsiyada Cambridge wuxuu sii haan doonaa mid ka kooban lix xubnood la soo magaacabo isla markana muddo laba sano ah soo doortaan codbixiyayaasha degmada ee guud ahaan magaalada, iyo duqa, oo noqon doonna xubinta toddobaad. Sida uu dhigayo Dastuurka Cusub ee Magaalada, xubnaha Guddiga Dugsiyada ayaa hadda ka dhex dooran doona xubnahooda la soo doortay mid noqda guddoomiye iyo mid kale oo noqda guddoomiye ku-xigeen. Guddiga Dugsiyada ayaa sii lahaan doonna dhammaan awoodaha loo igmaday guddiyada dugsiyada sida ku cad Xeerarka Guud ee Massachusetts, dastuurka, iyo xeerarka, oo ay ku jiraan magacaabista iyo xil ka qaadista maamulaha guud ee dugsiyada oo mas'uul ka noqon doona maamulka nidaamka waxbarashada, dejinta dhammaan siyaasadaha, xeerarka, iyo qawaaniinta macquulka ah ee lagu maamulayo nidaamka dugsiyada dadweynaha, iyo ansixinta iyo kormeerka maamulka miisaaniyadda hawlgalka sannadlaha ah ee waaxda waxbarashada, iyagoo oggolaansho ka haysata City Council.

Dastuurka cusub ee Magaalada waxaa loo habeeyay si qoddob-qoddob ah waxaana lagu qoray luuqad aan jinsi ku xirnayn, si ay bulshada ugu fududaato fahamkiisa iyo la jaanqaadkiisa.

Dastuurka cusub ee Magaalada waxa uu dejinayaa habraacyo kormeer iyo maaliyadeed oo cusub.

Dastuurka cusub ee Magaalada wuxuu sharciyeeyaa nidaamka doorashada saami qaybsiga matalaada ee magaalada waxana uu u oggolaanayaa Guddiga Doorashooyinka Magaalada in ay soo saaraan xeerar iyo inay isbeddello ku sameeyaan warqadda codbixinta ee kala sarreysiinta musharaxiinta iyo hanaanka tirinta codadka haddii loo baahdo si loo hubiyo hufnaanta iyo habsami u socodka hawlaha doorashooyinka magaalada.

Dastuurka cusub ee Magaalada waxa uu ku booriyaa isla tacaamulista bulshada islamarkaana wuxuu dardargeliyaa hannaanka codsiyada shacabka isagoo u marayo hindise iyo afti guud.

**Marka loo eego Qoddobka 630 ee Xeerarka 1989, Guddida Doorashooyinka waxaa looga baahan yahay inay daabacaan doodaha taageersan iyo kuwa lidka ku ah su'aal loo gudbiyay qaasatan cod-bixiyayaasha Cambridge. Halkan waxaa ku taxan doodaha noocaas ah:**

## DOOD TAAGEERAYSA DASTUURKA LA SOO JEEDIYEY

Dastuurka waa dukumentiga sharciyeed ee ugu muhiimsan magaalada, kaasoo qeexaya nidaamka iyo abaabulka dowladda hoose. Cambridge ma aysan wax ka beddelis ku samaynin dastuurkeeda tan iyo markii la qaatay nidaamka maamulka Plan E sanadkii 1940, taas oo ah 85 sano ka hor. Dastuurkeenu waxa uu ahaa mid dhaqangashan halka magaalada iyo dunidu ay si weyn isu sii beddelayeen.

HAA haddii aad u codeyso su'aasha ku jirta warqadda codbixinta waxay ka dhigan tahay in Magaalada ay qaadato dastuur cusub oo laga soo diyaariyey wadatashiyada Guddiga Dib-u-eegista Dastuurka (Charter Review Committee) ee Magaalada iyo City Council muddadii labada sano ee la soo dhaafay. Dastuurka cusubi wuxuu qeexayaa islamarkaana fududaynayaa hab dhigaalkiisa isagoo adeegsanaya abaabul wanaagsan, luuqad aan jinsiga ku xirnayn, iyo eray-bixin cusub si ay ugu fududaato shacabka inay fahmaan islamarkaana ay la jaanqadaan. Dastuurka cusub wuxuu la sii jaanqadayaa xukuumadda magaallada ee hadda ku dhisan City Council/City Manager wuxuuna xeerinayaa habraacyo cusub oo kormeer iyo isla xisaabtan ku dheehan. Dastuurka cusub wuxuu la sii jaanqadayaa Guddiga Dugsiyada magaalada ee hadda jira, balse hadda guddoomiyaheeda waxaa laga dooran doonaa xubnaha guddiga dhexdiisa. Dastuurka cusub waxa uu xeerinayaa habraacyo iyo siyaasado cusub ee miisaaniyadeed kuwaas oo kor u qaadaya qorshaynta maaliyadeed iyo hufnaanta. Dastuurka cusubi waxa uu xeerinayaa nidaamka doorashada saami qaybsiga matalaada ee magaalada ee doorashadeeda dawladaha hoose, iyada oo siinaysa awood ay ku qaadato xeerar cusub oo hababka tirinta casriga ah, wareejinta codadka dheeriga ah, iyo habraacyo kale.
Dastuurka cusub wuxuu casriyeeyaa maamulka Cambridge, isaga oo xoojinaya ballanqaadkeena ku aaddan qiyamka hagaya magaalada sida sinnaanta, caddaaladda, kala-duwanaanta, ka-qaybgalka bulshada, iyo ka-mid

ahaanshaha. In HAA loo codeeyo waxay xaqiijin doontaa in nidaamka maamulka Magaalada iyo qiyamka hagaya ay sii dhaqangalsanaan donaan ilaa qarniga 21aad.

## DOOD LID KU AH DASTUURKA LA SOO JEEDIYEY

Tan iyo markii la ansixiyay sanadkii 1940, dastuurka Cambridge wuxuu ku shaqeynayay qaabka maamulka ee "Plan E", kaas oo waafaqsan sharciga gobolka si City Council uu u shaqaaleysiiyo City Manager oo u adeega sida maamulaha ugu sarreeya ee magaalada. Dastuurkeena Plan E wuxuu si wanaagsan ugu adeegay Magaalada isagoo siyey maamulid wax-ku-ool ah, xirfad leh, oo si degdeg ah uga jawaaba, taasoo ka caawisay in la daboolo baahiyaha dadka kala-duwan ee magaalada kuna taageeray in aan ka mid noqono magaalooyinka ugu barwaaqada badan Commonwealth. Inkastoo guushani jirto, sharci yaqaano qaarkood ayaa rajaynaya in Magaaladu ay iska dhaafto dastuurkan Plan E ee hadda jira, iyada oo loo marayo su'aashan loo codayn doono, lana qaato xeer cusub. Ansixidda dastuur cusub looma baahna, maadaama nidaam dawladeedka Magaalada ee Plan E City Council/City Manager, Guddiga Dugsiga, iyo doorashooyinka matalaadda saami qaybsiga ku salaysan la haysan doono. Qaar badan oo ka mid ah isbeddelada la soo jeediyay, sida qaybaheeda ku saabsan maaliyadda iyo miisaaniyadda Magaalada, ayaa sidoo kale aan loo baahnayn iyada oo ay Magaaladu horey qaadatay xeerkiisa ama siyaasadiisa. Isbeddellada lagu sameeyo habraacyada doorashada Magaalada si la mid ah uma baahna qaadashada dastuur cusub. Ugu dambeyntii, isbeddellada la soo jeediyay qaarkood waxay jebinayaan caqabadaha u dhexeeya hay'adaha sharci-dejinta iyo fulinta, taas oo hoos u dhigaysa kala qaybinta awoodaha isla markaana waxyeelaynaysa go'aan qaadashada.

Dastuurka la soo jeediyay waa mid aan loo baahnayn oo waxna kuma soo kordhinaayo waxa uu dastuurka Magaalada ee Plan E uu horeba u gaadhay: horumarinta maamul wanaaga iyo sii wadida ballanqaadka Magaalada ee sinnaanta, kala duwanaanta, ka qaybgalka bulshada, iyo is-dhexgalka. Dastuurka Magaalada ee hadda jira ee Plan E wa uu shaqaynayaa, in loo codeeyo MAYA waxay u oggolanaysaa inuu ka sii shaqeeyo Magaalada laguna maamulo shacabka ilaa qarniga 21aad.

**Si aad u aragto noocyada kala duwan ee luqadaha badan ee su'aasha doorashada ee kooban iyo Axdiga cusub ee Magaalada la soo jeediyay oo dhan, fadlan booqo www.cambridgema.gov/charterquestion**